



# Golaha Badbaadbada Sool, Sanaag iyo Cayn (Sool, Sanaag and Cayn Salvation Council)

25ta Juun 2020



# War Murtiyeed

Munaasibadan ama shirkan waxaan u qabanay inaan ku soo gudbino war murtiyeed ka soo baxay gole ay ku midoobeen waxgaradka gobolada SSC oo Soomaaliya oo kala jooga dalka gudihiisa iyo debediisaba. Golahan magaciisa waaxaa la yiraahdaa **Golaha Badbaadaba Sool, Sanaag iyo Cayn**, waxaana aasaasay waxgarad ka kooban odayaal, aqoonyahan, siyaasiyiin, saraakiil ciidan, ganacsato, dhalinyaro, haween iyo dhamaan qaybaha bulshada SSC.

Ujeedooyinka Golaha Badbaadada SSC loo aasaasay waa ka mid ah;

- In shacabka gobolada SSC ay helaan nabad iyo xasilooni cadaadal ku dhisan, lagana hortago colaadaha soo noqnoqday ee maamulka Somaliland dhex dhigay qaybo ka mid ah beelaha iyo deegaanada SSC.
- In deegaanada SSC laga saaro ciidamada gooni-u-goosadka Soomaaliland ee ku soo duulay gobolada SSC, iyadoo la xaqiijinayo inaan dadka iyo gobolada SSC loo adeegsan kala goynta iyo kala qaybinta dadka iyo dalka Soomaaliyeed.
- In si buuxda looga hortago dhulboobka, barakicinta iyo xasuuqa gooni-u-goosadka Somaliland ku hayaan dadka iyo gobolada SSC.
- In dadka ku dhaqan gobolada SSC ay buuxda uga qayb galaan nimaadka federaaliga ah ee Soomaaliya, ayna helaan xaq ay u leeyihiin aaya-ka-tashigooda iyo inay iyagu ismaamulaan.
- In laga badbaadiyo dadka SSC dib-u-dhaca nololeed ee ka dhashay maamul la'aanta iyo weerarka joogtada ah ee gooni-u-goosadka Somaliland ku hayaan dadka iyo gobolada SSC.
- In kor loo qaado, tayada iyo tirada adeegyada bulshada, lana xaqiijiyo inaan cidina hor hor istaagi karin mashaariicda bini'aadnimo, horumarinta iyo dhaqdhaqaaqa ganacsiga xorta ah.

Hadaba, si loo gaadho hadafyada kor ku xusan; Golaha Badbaadaba SSC wuxuu ku baaqayaa, kana hawl geli doonaa;

- Waa in la miydeeyo ciidamada SSC si ay gobolada SSC uga xoreeyaan gooni-u-goosadka Somaliland ee ku soo duulay. Waana in dib loo dhiso maamulkii dadka SSC lahaayeen ee **Khaatumo**, si loo xoojiyo nabada SSC iyo midnimada Soomaaliya.
- Waxaan ugu baaqaynaa waxgaradka iyo hogaamiyeyaasha beelaha gobolada waqooyiga Soomaaliya ee midnimo doonka ah isugu yimaadaan wadatashi si ay uga tashadaan aayahooda.

- Maamulka Somaliland waxaan ugu baaqaynaa inay kala baxaan ciidamadooda gobolada SSC si loo xaqiijiyo nabad ku wada noolaanshaha dadka Soomaaliyeed.
- Waa in dadka SSC si toos ah oo firfircoon uga qayb galaan wadahadalada dib u dhiska qaranimada Soomaaliya, aysana jirin cid ku meleti karta wadahadalada u dhexeeya Dawlada Soomaaliya iyo Maamulka Somaliland.
- Dawlada Federaalka ee Soomaaliya waxaan ugu baaqaynaa inay aqoonsato xaq dadka SSC u leeyihiin inay aayahooda ka tashadaan, ulana dhaqanto si la mid ah beelaha iyo gobolada kale ee dalka. Dawlada Federaalka Soomaaliya waa inay nabada iyo midnimada Soomaaliya ku raadiso habka ay ku samaysmeen maamul goboleedyada Soomaaliya oo ah inay israacaan dadka iyo gobolada is ogol.
- Dawlada Federaalka ee Soomaaliya waxaan xusuusinaynaa, sida ay cadeeyeen madax dhaqameedka iyo dhamaan bulshada SSC in Somaliland aysan meteli karin dadka waqooyiga Soomaaliya degan oo dhan, metelaadaasi sharci ahaan sax ma aha maadaama dadka SSC ay si cad u xaqiijiyeen inaysan waxna ka dhisan, kana mid ahayn, kana mid noqon doonin maamulka Somaliland. Hadii la siiyo maamulkaas metelaad aysan xaq u lahayn, taasi waxayna sii xoojinaysaa rabitaanka gogooni-u-goosashada waxayna fogeynaysaa rajada midnimada umadda Soomaaliyeed.
- Dawlada Federaalka ee Soomaaliya, qaramada midoobay iyo dhamaan beesha caalamka waxaan ugu baaqaynaa inay xaqiijiyaan in dadka SSC ay helaan mashaariicda bini'aadhimnimo iyo kuwa horumarinta si toos ah. iyadoo aan la siyaasadayn cidina hor istaagin.
- Maamul Goboleedyada iyo dhamaan shacabka Soomaaliyeed waxaan ugu baaqaynaa inay nagu taageeraan xaq dadka SSC u leeyihiin inay nabad helaan iyo inay aayahooda ka tashadaan, sida gobolada kale ee dalka.
- Waxaan u cadaynaynaa wadamadii hormuudka ka ahaa dhexdhexaadinta wadahadalada Dawlada Federaalka Soomaaliya iyo maamulka Somaliland in maamulka Somaliland marna meteli karin dadka SSC maadaama aysan waxba ka dhisan, kana mid ahayn maamulkaas sida ay in badan cadeeyeen madax dhaqameedka iyo bulshada SSC. Soomaaliya waa 18 gobol oo siman, mana jiro gobol masuul ka ah gobol kale. Somaliland weerar iyo colaad joogto ah ayey ku haysaa gobolada SSC mana aha in lagu abaal mariyo taas, halkii lagala xisaabtami lahaa.

**-Dhamaad-**